

TILMAAMAYAASHA MASHRUUCA CAAFIMAADKA BULSHADA CULLY PARK: **La cabirayo waxyaalaha muhiimada leh si loo abuuro xaafad caafimaad leh** *Warbixinta Maamulka*

Ku saabsan Tilmaamayaasha Mashruuca Caafimaadka Bulshada Cully Park

Mashruuca tilmaamayaashu (indicators) wuxuu ka dhashay dadaal la sameeyay si goob qashin-qub ahaan jirtay dusheeda looga dhiso beer nasasho taasi oo ku taala xaafad leh meelo aanan badnayn oo badbaado ah, meelo dibada ku yaala oo carruurto ku cayaarto. Dadka degan xaafada Cully ee waqooyi bari ee Portland waxay rabeen goob xaafadooda ka tirsan oo ay iskugu imaan karaan, nolol cusubi ka muuqato xiriirna ku dhexmari karo oo qaab degaan leh. Mashruucu hawshiisa waxaa ka qayb-qaatay gobolka iyo hay'adaha, ururrada aan faa'iido doonka ahayn, ururrada bulshada ku salaysan iyo dadka xaafada degan. Verde iyo Maamulka Caafimaadka Oregon-Waaxda Caafimaadka Dadweynaha (OHA-PHD) ee Brownfields Initiative ayaa hawsha wada waday. Verde waa urur aan faa'iido doon ahayn oo ka jira xaafada Cully kaasi oo dhisa dhaqaalaha dadka dakhligoodu hooseeyo iyagoo adeegsanaya hay'adaha dhaqaale ee bulshada, bixinta adeeg iyo taageerada bulsho. OHA-PHD Brownfields Initiative waxay dhiiri gelisaa caafimaadka bulshada iyadoo xubnaha bulshada ka qayb galinaysa dib u horumarinta ama dib u adeegsiga hantida banaan ama wasakhdu soo gaartay ee xaafadahooda ku taala.

Waa maxay “tilmaame” waana maxay sababta uu muhiimka u yahay?

Tilmaamayaasha waxaa loo isticmaalaa in lagu cabiro haddii uu ay dhacayaan isbeddelo fiican ama xun. Tusaale ahaan, ma jiraan wadooyin jidka hareertiisa ku yaala oo lagu socda oo xaafadaadu leedahay? Wadooyinka jidka hareertiisa ku yaala ee lagu socdo waa tilmaame loogu tala galay sida fudud ama adag ee dadku ay iskugu gudbi karaan bulshadooda dhexdeeda. Marka ay jiraan wadooyin badan oo jidka hareertiisa ku yaala oo lagu socon karo, waxaa markaa jiraya in dad badani dibada u baxaan oo ay lugeeyaan iyadoo ay u fududaato dhamaan xubnaha bulshada ka tirsani in ay ka tagaan meel iyagoo u socda meel kale. Tilmaamayaasha kale waxaa ka mid ah nalalka saxda ah jidadka lagu xiro, meelaha jidadku iskaga gudbaan oo badbaado leh ama meelaha bulshadu iskugu timaado oo badbaado leh. La socodka tilmaamidan oo kale waxay muujin doonaan in xaafadi ay u socoto horumarkii ay hiigsanaysay ee ahaa in ay noqoto bulsho caafimaad leh. Sidoo kale waxaa lagu ogaadaa halka looga baahan yahay maalgalin iyo ilaha kale si loo gaaro hadafkaasi. Marka ay bulshadu ogaadaan tilmaamayaasha oo baahidooda ka hadlaya, waxay kordhisaa awoodooda ay ugu ololayn karaan in ay helaan waxyaalahan ay rabaan.



Aan lahayn meel wado ah oo lagu socdo

Sawirada waxaa qaaaday Youth Participants of the Cully PHOTO project

Ilaha: Cully PHOTO Project (Photography cHanneling yOuth To cOMmunity) waxaa dhaqaalihisa bixiyay Portland State University

Sidee loo doortay tilmaamayaasha mashruucan?

Koox kala duwan oo ka kooban iyo dadka degan xaafada Cully oo loo yaqaan Talaabo qaadida Bulshada Xiriirka leh “Community Action Partners” (CAP), ayaa kulmay si ay uga wada hadlaan sidii ay dib ugu horumarin lahaayeen goobta qashin-qubka ahaan jirtay oo looga dhigi lahaa beer nasasho oo sare u qaadi karta caafimaadka bulshadooda. CAP waxay ogaatay waxyaalaha caafimaad ahaan bulshadu danaynayaan, sida isticmaalida beerta nasashada si sare loogu qaado caafimaad qabka jirka, oo looga hortaggo ama loo maareeyo xaaladdaha caafimaad sida buurnida iyo sonkorta, si wax looga qabto culayska nafsad ahaan qofka la soo darsa sarena loogu qaado caafimaadka maskax iyo nafsad ahaaneed, loogana hortaggo rabshada ay sameeyaan dhalinyaradu, bulsho ahaana la iskugu keeno si loo dhiso hab taageero oo ka dhex jira xaafada, loona fidiyo meel fiican ee loogu tala galay in ay wax ku qabsadaan sidoo kalena ku cayaaraan qoysasku. Waxyaalaha caafimaad ahaan bulshadu danaynayaan ee ay ogaatay CAP ayaa sababtay in tilmaamayaashu doorteen mashruucan.

Verda iyo OHA-PHD waxay sidoo kale abaabushay koox farsamo oo keenay khariidadaha/maababka, warbixinada iyo xogta iyagoo siiyay bulshada si ay u noqdaan waxyaalo ay u isticmaalaan marka ay dooranayaan tilmaamayaasha (indicators). Guddiga Talo bixinta Farsamo “Technical Advisory Panel” (TAP) waxaa ka tirsanaa dad khibrad leh iyo kalkaaliyayaal ka socday qaybta daryeelka caafimaad, gobolka iyo caafimaadka dadweynaha ee degaanka, waxbarashada, ururada aan faa’iido donka ahayn ee culayska saara in wax la wadaago, Xarunta Dhalinyarada iyo Qoyka Hindida Maraykanka ah (NAYA), iyo Beeraha Nasashada & Raaxada Portland (PP&R).

Sidee ayaa waxyaalaha caafimaad ahaan bulshadu danaynayaan loo adeegsaday si loogu ogaado “tilmaamayaasha”

A. La abaabulayo bulshada si loo ogaado waxyaalaha ay caafimaad ahaan danaynayaan

CAP waxay saddex jeer ku kulmeen dugsiga hoose ee degaanka si ay uga wada hadlaan waxyaalaha ay caafimaad ahaan danaynayaan una sameeyaan qorshe lagula soconayo horumarka ka jira degaanka. Ka qayb-qaatayaashu waxay dib u fiiriyeen khariidadaha/maababka xogta ee ka turjumaysa xaaladda ay xaafadu hada ku sugan tahay. Tusaale ahaan, mid ka mid ah khariidada/maabka ayaa muujiyay halka beerta nasashada iyo meelaha dibada ku yaala ee bulshadu ay hada kaga yaalaan xaafada. Tusaalooyin kale ayaa keenay in laga wada hadlo qiyaasta cudurka sonkorta ee ka jirta xaafada Cully, marka loo eego xaafadaha kale ee u dhow iyo qiyaasta saraysa ee carruurta ee ku nool meel u dhow beerta nasashada ee mustaqbalka la samaynayso, marka loo eego goobaha kale xaafada. Intii lagu jiray kulanada, in ka badan 40 tilmaamayaasha caafimaadka la xiriira ayaa la ogaaday iyadoo loo sameeyay qorshe lagula socdo.

Sidoo kale kulanada CAP waxay noqdeen kuwo dad meelo kala duwan ka jeeda oo dhaqano kala duwan leh ay isku dhex galayaan. Cunto ayaa la wadaagay, carruurtuna waa wada cayaareen, daryeel caafimaad iyo adeegyo turjubaan ayaa la bixiyay iyadoo gaadiid marka loo baahdo la sii diyaariyay ay jireen.



“Wordle” waxaa laga soo qaatay liiska bulshada ee waxyaalaha bulshadu ogaatay ee ay caafimaad ahaan danaynayaan

B. Muhiimad siinta waxyaalaha caafimaad ahaan bulshadu rabaan:

Intii ay socdeen kulanada CAP taageerada dhanka xogta la xiriirtay waxaa bixiyay TAP, waxaa cadaatay in xogtaasi ayna ahayn mid ka jirta meelo badan oo ka mid ah waxyaalaha caafimaad ahaan la danaynayo ee ay bulshadu ogaatay. Tusaale ahaan, waxyaalaha bulshadu danaynayso marka ay noqoto cabirka “*dareenka ku aadan wanaaga dadka halkaasi degan ay ku sugan yihiin markii goobtii qashin-qub ahaan jirtay laga dhigay meel lagu nool yahay iyo meel beer nasasho,*” ma lahayn xog laga hayo si loo isticmaalo la socodka horumarka ay samaynayso. Noocan xog urrurin waxay u baahan yahay isla shaqayn, dhaqaale iyo dadaal abaabulan si loo horumariyo xaafadana looguna qaybiyo ra’yi urrurinta, loona helo tirada natiijooyinka soo baxa, iyadoo wakhtiyada qaarkood dib loo qaybin doono ra’yi urrurinta si loola socdo wixii isbeddel ah loona cabiro horumarka la samaynayo. Sidaa darteed, CAP waxay go’aanku gaartay in ay *diiwaanka geliso* dhamaan waxyaalaha caafimaad ahaan la danaynayo, laakiin muhiimada ay siiso kuwa: 1) ay bulshadu aad u danaynaysay, iyo 2) kuwa lahaa xog la hayay oo markaasi jirtay. Waxyaalaha soo socdaa waa liiska waxyaalaha bulshadu ogaatay ee ay caafimaad ahaan danaynayaan ee buuxiyay labbadaa shuruudood:

Muhiimada waxyaalaha caafimaad ahaan bulshadu danaynayaan ee ay ogaadeen xubnaha bulshada ka tirsani:

1. Helida meelo dibada ku yaala oo dheeraad ah oo bulshada ay iskugu timaado (sida dukaanada “kiosk” si macluumaadka la isku dhaafsado).
2. Helida meelo dibada ku yaala oo dheeraad ah oo carruurta ku cayaarto.
3. Dareemida ay xaafadu dareemayso in tahay mid ammaan ah marka laga hadlayo dambiga, rabshada ay sameeyaan dhalinyaradu iyo ta guudba.
4. In si nabad ah lagu aado beerta nasashada, sida wadooyinka jidka hareertiisa ku yaala ee lagu socdo oo tayadooda sare loo qaaday, jidadka baaskiilada/bushkuleetiga, hababka isku socodka gawaarida loogu tala galay iyo nalalka jidadka ku yaala ee u dhexeeya dugsiyada, guryaha iyo beerta nasashada.
5. Musqulo ammaan ah oo la isticmaalo inta la joogo beerta nasashada (iyo marka lagu sii socdo beerta nasashada).
6. Qorshe u samaynta carruurta iyo bulshada, taasi oo ay ka mid tahay cuntooyinka wakhtiga xagaaga ah oo lacag la’aan ah ee Portland oo loogu tala galay dhalinyarada dakhligoodu hooseeyo.
7. Farshaxanka dhaqanka la xiriira, waxyaalaha gacanta lagu sameeyo, hawlo qabashada iyo qorshe dejinta.
8. Waxyaalaha lagu dhiiri gelinayo isdhexgalka dad meelo kala duwan ka jeeda.
9. Meelo isku xiraya waxyaalaha la aaminsan yahay, dabaaldegyada iyo kulannada bulshada.



Qoobka Cayaarka Cawska, Xafladda Barakada Qabiilka ee Cully Park. Laga soo xigtay: Saria Dy

C. Xulashada hab tilmaameedka (indicators) si loola socdo horumarka ay samaynayso waxyaalaha ay caafimaad la danaynayo

Boggaga soo socda ee warqadan daabacan ee dadka la siinayo waxaa la socda sharaxaad kooban oo ku saabsan tilmaamayaasha la doortay iyo qiyaasta dhibcaha ama darajada tilmaame kasta. Guud ahaan, waxaa loo arkaa in ay tahay ta ugu fiican si loola socdo hab tilmaameed iyadoo la urrurinayo xogta cusub 2-5 sanno ee kasta. Tilmaamayaashan waxay ka caawin doonaan in ay kordhiyaan talaabo qaadida bulshada dhexdeeda iyo hay'adaha ay shaqadu ka dhaxayso iyo urruradu raba in ay dhiiri geliyaan caafimaadka iyadoo adeegsanaya horumarinta beerta nasashada. Kuwo ka mid ah waxyaalaha bulshadu ogaatay ee ay caafimaad ahaan danaynayaan heerka ay taagan yihiin lama sheegi karo ama lama qiimayn karo, sababtoo ah kaliya waxay noqonayaan in la yiraahdo hawshii waa "la buuxiyay" ama "lama buuxin" ka dib marka talaabo la qaado. Tusaale ahaan, marka musqusha la dhiso ee la furo si loo isticmaalo tilmaame waxaa la oranayaa hawshii waa "la buuxiyay." Si kastaba ha ahaatee, waxaa suuragal ah in bulshadu wali la socdaan xaaladaha kala duwan ee jira sida burburinta, si khalad u isticmaalida ama nadaafadda musqusha si loo qiimeeyo ammaanka ay ku sugan tahay.

(Qiyaasta) Tilmaamayaasha Caafimaadka Bulshada Cully Park:

Macnaha ay ugu fadhiyaan caafimaadka

La socodka tilmaamayaashani waxay ka caawin doonaan in ay muujiyaan in xaaladaha ay ku sugan tahay xaafadu ay ka soo raynayso, ka sii darayso ama sideedii hore tahay.

Tilmaame:	Heerka ama Darajada
Inta ay isku jiraan beerta nasashada iyo degaanada dabiiciga ah: Beeraha nasashada iyo degaanada dabiiciga ah waxay noqdaan meel aan rasmi ahayn oo la iskugu yimaado fursadana ay ka helaan dhamaan bulshadu si ay jir ahaan u noqdaan kuwo firfircoon. Wakhtiga lagu qaato beeraha nasashada iyo degaanada dabiiciga ah waxay keentaa waxka qabashada caafimaad ee dhibaata maskaxeed, iyadoo dhiiri galisa horumarka maskaxda iyo daryeelka degaanka.	44 <i>(marka loo eego 100-kiiba)</i>
Dadka booqanaya beerta nasashada ee guryahooda u dhow ugu yaraan hal mar 12 bilood ee la soo dhaafay: Haddii ay beeraha nasashadu yihiin kuwo aad u fog, oo ay adag tahay in la aado karo ama ay yihiin kuwo aan ammaan ahayn, dadka degani lagama yaabo in ay booqdaan. Marka ay jiraan dad badan oo booqda beeraha nasashada ee guryahooda u dhow, waxaa markaa jiraya in ay badato ka faa'iidayso.	55%
Tirada meelaha dibada ku yaala ee bulshadu gali karto: Tirada iyo noocyada meelaha dibada ku yaala ee ay heli karaan dadka degani waxay saamayn ku yeelataa dhaqdhaqaaqa jirka iyo awooda isdhexgal ee bulshadu isku dhexgalayaan meelaha dibada ku yaala. Taasi waxaa dheer, fursadaha lagu beerayo cunto nafaqo leh iyo ku xirnaanta lagu xirnaanayo dabeecada jirta si loo helo faa'iidooyinka caafimaad ee maskaxeed, jir iyo waxyaalaha la aaminsan yahay.	8
Qiyaasta dadka dareemaya in ay badbaado ku qabaan in ay kalidood u lugeeyaan beeraha nasashada maalintii: Waxaa jira xiriir toos ah oo ka dhexeeya beeraha nasashada ee ammaanka ah iyo isticmaalkooda. Haddii beeraha nasashadu noqdaan kuwo aan ammaan ahayn ka dib markaa si aad ah uma isticmaalaan bulshadu. Dareemida la dareemayo in aan ammaan jirin waxay keentaa culays nafsad ahaan qofka la soo dersa, walaac iyo cabsi, taasi oo si xun saamayn ugu yeelata caafimaadka.	81%
Qiyaasta dadka dareemaya in ay badbaado ku qabaan in ay kalidood u lugeeyaan beeraha nasashada habeenkii: Sida tilmaamaha oo kale cabirka ku saabsan ammaanka ee la helay maalintii, tilmaamahani wuxuu cabiraa haddii dadka degan ay ammaan dareemaan habeenkii. Cabsida laga qabo dambi dhaca waxaa lala xiriirayaa caafimaad maskaxeed oo liita, iyo dhaqdhaqaaqa jireed oo hoos u dhaca iyo nolol aad u hoosaysa.	30%
Socodka la socon karo (qiyaasta wadada jidka hareertiisa ku taala ee lagu socdo): Xaafadaha leh meelo badan oo lagu socon karo waxaa lala xiriiriyaa koror ku yimaada dhaqdhaqaaqa jireed, koror ku yimaada dhaqaalaha bulshada iyo koror ku yimaada caafimaadka maskaxda. Socodka la socon karo waxaa aad u kordhiyay wadada jidka hareertiisa ku taala ee lagu socda, gaar ahaan iyadoo u fiican carruurta, qoysaska, iyo dadka waawayn iyo naafada. Waxyaalaha kale ee socodka ku saabsan ee lagu kordhinayo badbaabada iyo ammaanka waxaa ka mid ah nalal bulshada loogu tala galay, meelo badbaado leh oo jidka dadku iskaga gudbaan iyo hab isku socodka gawaarida loogu tala talay sida	1.8 <i>(marka loo eego 5-tiiba)</i>

yaraynta masaafada gaarigu ku socdo iyo ku darida caqabado aanu gaarigu aad u socon karin.	
Musqulo ammaan ah: Meelaha muhiimka ah sida musqulo ammaan ahi waxay dhiiri galisaa isticmaalida beeraha nasashada iyadoo gaar ahaan muhiim u ah qoysaska haysta carruur iyo dadka waawayn oo da'doodu kala duwan tahay oo leh xaalad ayna xajin karin kaadida.	Lama buuxin (Unmet)
Barnaamijyada dhaqanka la xiriira: Xaafada Cully Park waa mid ka mid ah meelaha ugu badan Portland ee dadka kala duwan ku nool yihiin. Iyadoo la xaqiijinaya in waxyaalaha la xiriira hawlaha ka jira beerta nasashadu noqdaan kuwo soo jiita oo sharfa dadka dhaqanada kala duwan leh iyo bulshooyinka ku nool meel u dhow beerta nasashada. CAP waxay ogaatay habab badan oo tani u kordhiso caafimaadka bulshada, taasi oo ay ka mid tahay kor u qaadida kalsoonida qofka, iyo dhiiri galinta is aqoonsiga qof ahaaneed iyo bulsho, dhiiri galinta ixtiraamka dhaqanada kala duwan ee la leeyahay iyadoo la isticmaalayo barashada dhaqanada kala duwan, iyo samaynta fursado loo samaynayo dhalinyrada si ay ugu qayb-qaataan waxyaalaha u ogolaanaya in ay sii wadaan ku xirka dhaqanka lagu xirayo dunida caadiga ah.	Lama buuxin (Unmet)
Hawlaha iyo kulanada dadka meelaha kala duwan ka soo jeeda: Dhiiri galinta xiriirka ka dhexeeya da'ada kala duwan waxay suuragalisa in la wadaago xikmada, waxyaalaha dhaqanka loo leeyahay iyo qiimaha la leeyahay, iyadoo dhista is aqoonsi shakhsiyeed iyo bulsho. Isku xirka dadka waawayn iyo jiilka yar yar si waxay taageero ka geysataa yaraynta kalinimada, iyadoo dhiiri galisa saaxiibtinimada ka dhaxaysa dadka waawayn iyo kuwa yar yar, iyadoo kordhisa u dulqaadashada kala duwanaanshaha dhanka da'ada, iyadoo kordhisa isku xirnaanshaha bulsho ee xaafada dhexdeeda.	Lama buuxin (Unmet)
Cuntooyinka wakhtiga xagaaga ah oo lacag la'aan ah oo laga helayo Cully Park: Waxaa jira waxyaalo badan oo cayima helida carruurta ee cunto nafaqo leh wakhtiga xagaaga ah. Marka dugsigu xiran yahay, barnaamijyada cuntada lacag la'aanta ah waxay taageero ka geystaan xaqiijinta in carruurtaasi u baahan cuntadu ay heli karaan ugu yaraan hal cunto oo nafaqo leh maalintii. Barnaamijkani wuxuu taageero ka geysan karaa in uu kordhiyo helida guri helo cunto, kordhinta xaalada nafaqo ee carruurta u baahan iyo balaarinta isdhexgalka dadka ee keena dhismaha bulsho.	Lama buuxin (Unmet)
U isticmaalida beerta nasashada ee dabaaldegyada iyo isku imaanshaha bulshada: U isticmaalida beerta nasashada ee dabaaldegyada muhiimka ah iyo isku imaanshaha, wayn ama yar (xafladaha qalin jabinta, dhalashada 15-aad ee gabar "quinceañeras" iyo xafladaha aroos, iwm.) Waxay dhiiri galisaa caafimaadka dadweynaha iyo soo kabashada bulshada. Istimalka goobaha dadweynaha ee loogu tala galay dhismaha bulshadu wuxuu kordhisaa wadajirka bulshada iyo dareenka isku xirnaansho ee ka dhexeeya deriska. Wadajirka bulshadu waa shay muhiim u ah dhisida bulsho caafimaad qabta.	Lama buuxin (Unmet)



PUBLIC HEALTH DIVISION

Brownfields Initiative

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan warbixintan, fadlan kala xiriir EHAP ehap.info@state.or.us ama wac 1-877-290-6767.

SM (10/3/14)

Qoraalkani waa la bixin karaa isagoo qaab kale ah marka ay codsadaan dadka naafada ah ama dadka leh luqad aan ahayn Af-Ingiriisiga ee leh xirfad luqada Af-Ingiriisiga ah oo cayiman. Si aad u codsato daabacaadan oo qaab kale ah ama luqad kale ku qoran, la xiriir Barnaamijka Qiimeynta Caafimaadka Deegaanka 'Environmental Health Assessment Program' 971-673-1244 ama 971-673-0372 ee TTY.